

Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP: Waxa ay tahay In la ogaado Haddii Dhawaan Lagaa Sii daayay Jeel ama Xabsi, ama Goobo La isku hayo oo kale



Nooca Gaaban

Isbeddelo la xiriira federaalka awgood, laga bilaabo Janaayo 1, 2027, xubnaha ka tirsan OHP qaarkood ee da'doodu tahay 19–64 waa in ay buuxiyaan xeerarka shaqada ama hawsha marka ay codsadaan ama dib u cusbooneysiyaan caymiskooda. Tilmaamahani waxay sharaxayaan sida loogu qalmo wax la iska dhaafayo ama loo buuxiyo xeerarka, iyo sida loogu xirnaado OHP marka dhawaan lagaa sii daayay goob la isku hayo 'carceral setting' sida jeel, xabsi, xarun dhallinyarada lagu hayo, ama xarunta dhaqan-calinta dhallinyarada.



Waxa ay tahay In la ogaado Haddii Dhawaan Lagaa Sii daayay Jeel ama Xabsi, ama Goobo La isku hayo oo kale

Calaamadee haddii mid ama ka badan oo ah kuwani ku khuseeyaan. Waxaa dhici karta in aadan u baahnayn in aad shaqeyso, tabarucaad sameyso, aado dugsi, ama sameyso tababar ama hawlo kale si aad u sii haysato OHP aad leedahay. Waxaa dhici karta in lagaaga baahdo in aad na siiso caddeyn.

- ✓ **Waxaad tahay qof wax codsanaya oo cusub oo loogu talagalay OHP oo waxaa lagu sii daayay afartii bilood ee la soo dhaafay**
- ✓ **Waxaad dib u cusbooneysiinaysaa OHP aad leedahay oo waxaa lagu sii daayay sagaalkii bilood ee la soo dhaafay**

Waxaa dhici karta in aad u qalanto wax la iska dhaafayo oo kale haddii

- ✓ Aad qabto naafanimo ama xaalad caafimaad oo halis ah ama naafanimo keenaysa
- ✓ Aad tahay Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska
- ✓ Aad tahay qof soo halgamay oo leh qiimeynta naafanimada oo buuxda
- ✓ Lagaaga baahan yahay in aad buuxiso xeerarka shaqada ama hawsha ee SNAP
- ✓ Aad leedahay xanuunka isticmaalka khamriga ama daroogada, ama (waxaad ku jirtaa daaweyn (oo ay ku jiraan daawooyin loogu talagalay xanuunka isticmaalka opioid-ka)

Booqo <https://OHP.Oregon.gov/HR1> si aad u hesho liiska buuxa.

Aan hubin miyaa in mid ka mid ah kuwani ku khuseeyo? U sheeg OHP si kastaba ha ahaatee.

Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP: Waxa ay tahay In la ogaado Haddii Dhawaan Lagaa Sii daayay Jeel ama Xabsi, ama Goobo La isku hayo oo kale



Sida Loogu Xirnaado OHP

Haddii aadan lahayn cinwaan joogto ah, hubi in degaankaagu yahay mid macluumaadkiisu cusub yahay. Uma baahnid cinwaan joogto ah si aad u hesho ama u sii haysato OHP. Ka dhig lambarkaaga telefoonka, email-kaaga, ama cinwaankaaga boostada mid cusub haddii aad karto.

Koontadaada Dhanka internet-ka ee ONE ka fiiri <https://benefits.oregon.gov/>. Waxaad sameyn kartaa koontada dhanka internet-ka ama isticmaal app-ka Oregon ONE Mobile ee lacag la'aanta ah si aad kiiskaaga u hubiso wakhti kasta, meel kasta. Waxaad sidoo kale arki kartaa ogeysiisyadaada.

La shaqee kaaliye ay aqoonsan tahay OHP. Mid ka hel <https://oregonhealthcare.gov/GetHelp>.

Go'aanso haddii aad jecleen lahayd in aad magacawdo wakiil la oggol yahay si uu kuu caawiyo. Kani waa in uu noqdaa qof kale oo aad ku kalsoon tahay. OHP waxay la soo xiriiri doontaa adiga iyo qofkaasba si aad u heshaan ogeysiisyo, waxayna kaa caawin karaan in aad soo dirto caddeyn ama aad ka soo jawaabto codsiyada.



Halka Laga helo Caawimaad oo laga Ogaan karo Waxyaabo Dheeraad ah



**Ogow waxyaabo dheeraad
ah oo ku saabsan HR1**

<https://OHP.Oregon.gov/HR1> →

**Dhanka internet-ka - isticmaal
App-ka Oregon ONE Mobile ee lacag
la'aanta ah ama samee koontada
Dhanka internet-ka ee ONE**

<https://benefits.oregon.gov/>

Wac

1-800-699-9075 (Wicitaanada gudbinta
waa la soo dhaweynayaa)

Hel kaaliyaha OHP

<https://oregonhealthcare.gov/GetHelp>

**Booqo xafiiska Waaxda
Adeegyada Dadweynaha ee
Oregon**

Xafiiska degaanka ka hel
<https://ODHSoffices.oregon.gov>

Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP: Waxa ay tahay In la ogaado Haddii Dhawaan Lagaa Sii daayay Jeel ama Xabsi, ama Goobo La isku hayo oo kale



Haddii OHP Macluumaad Dheeraad ah Kaaga Baahan tahay

Waxaad heli doontaa ogeysiin sheegaysa waxa la dirayo ee loogu talagalay xeerarka, sida, iyo goorta ay tahay. Tani waxay ku imaan kartaa boostada ama email-ka, haddii aad dooratay.

Ma haysatid miyaa warqada saxda ah ee ku qoran ogeysiintaada? U sheeg OHP waxa aad haysato. Waxaa jiri karta siyaabo kale oo aad ku muujiso caddeyn.



Uma Qalantid miyaa Waxa la iska dhaafayo? 3 Siyaabood oo Loo buuxiyo Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP

Haddii mid ka mid ah waxyaabaha la iska dhaafayo aysan ku khuseynin, halkan waxaa ku qoran sida loo buuxiyo xeerarka.

1

Dakhliga

Sameyso wax ka badan \$580 bishii.

2

Dugsiga

Aad diiwaan gashan tahay ugu yaraan waqtiga barkiis.

3

Saacadaha

Shaqo isku dhafan, tabarucaad, dugsi, ama tababar loogu talagalay 80 saacadood bishii.

Booqo <https://OHP.Oregon.gov/HR1> wixii macluumaad dheeraad ah.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. OHP kala xiriir one.communications@odhsoha.oregon.gov.